QAYBAHA UU KA KOOBANYAHAY DARYEELKA CAAFIMAADKA DEGMADA DAKOTA
OGEYSIISKA KU SAABSAN DHAQANKA ASTURAN
Hirgalaya Abriil 14, 2003
Wax Laga Baddalay Maarxo 22, 2010

OGEYSIIKAN AYAA QEEXAYA SIDA MACLUUMAADKA CAAFIMAADKA IYO MACLUUMAADKA KALE EE ADIGA KUU GAARKA AH LOO ISTICMAALI KARO LOONA SIIDAYN KARO IYO SIDA AAD U HELI KARTID MACLUUMAADKAN. FADLAN SI TAXADDIR LEH UGU NOQO.

Sida sida uu qabo Sharciga Ku-Dhaqanka Xogta ee Dawladda Minnesota (Minnesota Government Data Practices Act) iyo Lahaanshada Caymiska Caafimaadka iyo Sharciga la Xisaabtanka (Health Insurance Portability and Accountability Act) ee 1996 (HIPAA), waxaad xaq u leedahay asturnaanta ku saabsan Macluumaadka Caafimaadka La-Ilaaliyo [Protected Health Information (PHI)]. Sharciyadaan waxay ilaaliyaan xaqa aad u leedahay asturnaanta ku saabsan PHIda aad leedahay, haseyeeshe sharciyadan waxay kalo u oggolaanayaan Degmada Dakota in ay macluumaadka isticmaasho iyo u siidayso kuwa kale marka sharciga uu sidaasi na farayo. Sida uu qabo HIPAA, waxaa nalaga rabaa in aan asturno PHIda aad leedahay iyo in aan ku siinno ogeysiis ku saabsan waajibaadyada naga saaran sharciga iyo dhaqanka asturan si aan u ilaalinno macluumaadkaada caafimaadka. Waxa aan xadidi doonnaa isticmaalka iyo siidaynta PHI illaa qaddarka ugu yar ee ku ku filan si lagu bixiyo adeegyada waxtarka lagugu siiyo adiga ama laga salagaaro ujeeddada looga danlahaa ee isticmaalka, siidaynta ama codsiga. Macluumaadka Caafimaadka La-Ilaaliyo (Protected Health Information) waa macluumaad caafimaad oo adiga kugu saabsan kaasoo loo isticmaali karo in adiga laguugu aqoonsado waxayna la xariirtaa xaaladahaada caafimaadka maskaxda ama jirka ee hore u jiray, waqtiga la joogo, ama mustaqbilka, adeegyada daryeelka caafimaadka la xariira, iyo kharash bixinta. Degmada Dakota ayaa laga rabaa in ay raacdo shuruudaha ogeysiiska iminka lagu dhaqmo.

Si-kasta ha ahatee, waxaan sii haysanaynaa xaqa aan u leennahay in aan wax ka baddalno dhaqamada asturan ee ku qeexan ogeysiiskaan, sida uu farayo sharciga. Isbaddallada ku yimaada dhaqamada asturan ee aan leenahay waxay quseeyaan dhammaan macluumaadka caafimaadka ee aan hayno iyo macluumaad kasta ee na soo gaara mustaqbalka. Haddii Degmada Dakota baddasho dhaqamada asturan, waxaan goob kasta iyo dhismo kasta oo ka tirsan Degmada Dakota ka soo saari doonaa ogeysiis aan ku bixin doonno sida u faraayo sharciga. Waxaad codsan kartaa koobiga ogeysiiskii ugu dambeeyay mar kasta ee aad soo booqatid dhismaha Degmada Dakota, ama waxaad ka heli kartaa internetka www.co.dakota.mn.us.

Ogeysiiskaan ayaa ka warbixinaya macluumaadka asturan ee la xariira isticmaalka iyo siidaynta PHIda ee quseysaa qaybaha ka kooban daryeelka caafimaadka la caymiyay ee Degmada Dakota Waaxda Adeegyada Bulshada (Social Services Department); Waaxda Gargaarka Dhaqaalaha iyo Shaqada (Employment and Economic Assistance Department) [marka laga reebo Masruufka Caruurta (except Child Support)]; Waaxda Caafimaadka Guud [marka laga reebo Adeegyada Kalkaalisada ay siiso Xabsiyada Degmada Dakota iyo Xakamaynta Cudurrada (except for Nursing Services provided do the Dakota County Jail and for Disease Control)]; Qeybta Madaniga ee Xafiiska Qareenka Degmada (Civil Division of the County Attorney's Office); Financial Services (Adeegyada Maaliyadda); Macluumaadka Farsamada (Information Technology); Degmada Dakota Akownka Misaaniyadda Dabacsan ee Daryeelka Caafimaadka (Dakota County Health Care Flexible Spending Account); iyo Waaxda Maamulka Adeegyada Jaaliyadda (Community Services Administration Department).

Amended June 25, 2009

Ogeysiiskaan waxaa laguugu turjumi doonaa luqado kale, haddii la codsado.

Degmada Dakota ayaa isticmaali karta iyo siidayn karta Macluumaadkaaga Caafimaadka Asturan ayadon aan la haysan Oggolaashadaada:

1. **Daaweynta**. Degmada Dakota ayaa isticmaali kartaa ama u siidayn kartaa macluumaadkaada caafimaadka bixiyaasha daryeelka caafimaadka sida dhaqaatiirta, kalkaaliyeyaasha, daaweeyeyaasha iyo shaqaalaha bulshada ee ku lug leh daryeelka caafimaadkaada. Tusaale, waxaa dhici karta in macluumaadka lala wadaago shaqaalaheenna ama bixiyaasheenna aan ka tirsanayn nidaamkeena si lagu abuuro ama lagu fuliyo qorshe la xariira daaweyntaada.

2. **Bixinta Kharashka**. Degmada Dakota ayaa isticmaali kartaa ama siidayn kartaa macluumaadkaada caafimaadka si lagu helo kharashka ama si lagu bixiyo adeegyada caafimaadkaaga. Tusaale, Degmada Dakota ayaa bixin karta PHIda si ay qorshaha caafimaadkaada ugu soo dallacdo daryeelka caafimaadka ee adiga lagu siiyay.

3. **Hawl-fulinta Daryeelka Caafimaadka**. Degmada Dakota ayaa isticmaali kartaa ama sidaayn kartaa macluumaadkaada caafimaad si ay ku maamusho barnaamijyadeeda iyo hawlaheeda. Tusaale, Degmada Dakota ayaa isticmaali karta PHIda aad leedahay si ay dib ugu eegto tayada adeegyada lagu siiyay, si loo tababaro shaqaalaha, ama in ay kuugu yeeraan magacaada inta aad joogtid meelaha leysku sugo marka shaqaalaha Degmada Dakota diyaar u yahiin in ay kula kulmaan.

4. **Ballamada iyo Macluumaadka Caafimaadka Kale**. Haddii aadan na dhihin ha samaynina, waxa dhici karta in Degmada Dakota ay kuu soo dirto xasuusiyeyaal la xariira baaritaannada caafimaadka ama daryeelka caafimaadka. Degmada Dakota ayaa dhici karta in ay kuu soo dirto macluumaad ku saabsan adeegyada caafimaadka kuwasoo laga yaabo in ay adiga dan kuu yihiin.

5. **Hawlaha Kormeerka Caafimaadka**. Degmada Dakota ayaa isticmaali kartaa ama u siidayn kartaa macluumaadka caafimaadkaaga shaqaalaha Degmada Dakota ama saraakiisha ka baxsan Degmada Dakota ujeeddo lagu fatashayo ama lagu baarayo bixiyaasha daryeelka caafimaadka.

6. **Hawlaha Caafimaadka Dadweynaha**. Degmada Dakota ayaa isticmaali kartaa ama u siidayn karta macluumaadka caafimaadkaaga hawlaha caafimaadka guud ama uu oggolyahay sharciga. Tan waxaa ka mid ah ayado la isticmaalo xogta caafimadkaaga si looga warbixiyo cudurrada faafa, dhimashada ama dhalashada, ama macluumaad la xariira xadgudubka ama dayaca caruurta.

7. **Tallaabooyinka Maamulka iyo Sharciga**. Waxaan siidayn karnaa macluumaadka caafimaadka adiga kugu saabsan iyadoo laga jawaabayo amarka maxkamadda ama wax kale oo sharcigu fasaxayo. Tusaale, waxaa dhici karto in amarka maxkamadda ama sharciga u baahan yahay in shaqaalaha Degmada Dakota la qaybsadaan PHI maxkamadda iyo qareennada ku jira kiiska maxkamadda qoyska.

8. **Fulinta Sharciga**. Waxaan u siiddayn karnaa macluumaadka caafimaadkaaga hayadaha fulinta sharciga marka uu farayo sharciga federaalka ama kan gobolka. Tusaale, sharciga ayaa dhici kara in shaqaalaha Degmada Dakota ay u siidayso hayadaha fulinta sharciga ayadoo laga jawaabayo dacwado sharci ah ama xaalado deg-degga ee caafimadka.

9. **Warbixinnada Xadgudubka ama Baaritaannada.** Haddii ay Degmada Dakota ka shakiso xadgudub, dayac, ama bahdilid, waxaan siidayn karnaa macluumadka caafimaadka ee adiga kugu saaban sida uu farayo ama uu oggolyahay sharciga.

10. **Barnaamijada Dawladda.** Degmada Dakota ayaa isticmaali kartaa ama siidayn kartaa PHI iyado la fiirinaayo danta guud ee hoos timaadda barnaamijyada kale ee dawladda sida uu oggol yahay sharciga.

11. **Warbixinta ku Socoto Saraakiisha Baarta Sababta Dhimashada, Baarayaasha Caafimaadka, iyo Maamulayaasha Mayd-aasidda**. Degmada Dakota waxay isticmaali kartaa ama siidayn kartaa PHIda ku socoto saraakiisha baarto sababta dhimashada, baarayaasha caafimaadka, iyo maamulayaasha mayd-aasidda sida u oggol yahay sharciga. Tusaale, waxaan u siidayn karnaa PHI sarkaalka baara sababta dhimashada ama baaraha caafimaadka si lagu aqoosnsod qofka ama lagu xaqiijiyo sababta keentay dhimashada.

12. **Baaritaanka**. Degmada Dakota ayaa isticmaali kartaa ama siidayn kartaa PHIdaada ujeeddooyin baaritaan awgeed sida uu oggolyahay sharciga.

13. **Arrimaha Ammaanka iyo Caafimaadka**. Degmada Dakota waxay isticmaali kartaa ama u siidayn kartaa PHIda aad leedahay fulinta sharciga si halis xun looga dhawro caafimaadka iyo ammaanka shaqsiga ama midka guud.

14. **Magta Shaqaalaha**. Degmada Dakota ayaa u siidayn kartaa PHIga aad leedahay sida uu qorayo sharciga Magdhawga Shaqaalaaha (Worker's Compensation) ama barnaamijyada lamid ah.

15. **Hawlaha Qaaska ah ee Dawladda**. Degmada Dakota ayaa u siidayn kartaa PHIda aad leedahay wakaaladaha dawladda ee wada hawlo qaasa, sida hawlaha askartii hore, hawlaha Ammaanka Qaranka iyo Basaasidda, Adeegyada Difaaca Madaxweyaha, hay'adaha xabsiyada/asluubta, iyo hay'ado kale ee fulinta sharciga iyo xaaladaha xirtaanka sida uu oggol yahay sharciga.

16. **Shaqsiyaadka ku Lug Leh Daryeelka ama Bixinta Kharashka Daryeelka**. Degmada Dakota ayaa u siidayn kartaa PHIda aad leedahay qoyska ama shaqsiyaadka kale ee aad adiga sheegtay in ay si toosa ugu lug leeyihiin daryeelka caafimaadkaada. Waxaad diidi kartaa la qeybsiga macluumaadkaan.

17. **Maxaabiista**. Degmada Dakota ayaa u siidayn kartaa PHIda aad leedahay hay'adda asluubta/xabsiga ee sharci ahaan adiga ku haya si hay'addu kuu siiso daryeelka caafimaadka, si loo badbaadiyo ammaankaada iyo caafimaadkaada ama ammaanka iyo caafimaadka dadka kale, ama ammaanka iyo nabadgalyada hay'adda.

18. **Marka Sharci ahaan la iska rabo**. Degmada Dakota ayaa isticmaali karta ama siidayn karta

PHI marka uu farayo sharciga federaaliga ama gobolka.

19. **U Waalidka Eeegi Karo.** Sharciga Minnesoa ayaa farayha in Degmada Dakota ay u siidayso PHI waalidka, ilaalada, iyo dadka sharci ahaan u dhigma booska xaaladaha badankooda. Waxa aan ula macaamili doonna sida uu qorayo sharciga Minnesota.

Marka laga reebo isticmaallada iyo siidaymaha kor ku xusan, Degmada Dakota ma ay isticmaali doonto ama ma siidaynay doonto PHIda aad leedahay amarkaada oo qoran la'aantiisa, waa haddii aanu jirin amar ka duwan ee uu sharciga farayo.

Xaq ayaad u leedahay Xuquuqda Asturan ee la xariira PHIgaaga:

1. **Xaq ayaad u leedahay in aad iska eegtid iyo heshid koobiyada macluumaadkaaga**, haddii aanay macluumaadka ku saabsanayn qoraallada daawaynta maskaxda, ama ururinta macluumaadka si macquula lagu sii oddorasayo, ama lagu isticmaalo, ama tallaabo maamul ama dacwad socota ee madani ah ama mid dambiyada ah. Codsiga waa inuu qoraal noqdo. Waxaa lagugu soo dallacayaa kharashka ku baxa koobiga laga samaynayo.

2. **Xaq ayaad u leedahay in aan wax ka baddalno macluumaadka caafimaadka ee aan ka hayno maclumaadka caafimaadkaaga ama lacag bixinta.** Codsigaagaa waa in uu ahaado mid qoraala waxana dhici kara in xaaladaha qaarkod aan kuu diidi karno codsigaaga.

3. **Xaq ayaad u leedahay Liistada Siidaymaha**. Xaq ayaad u leedahay in aad weydiisato liistada siidaymaha ee PHIgaaga oo ay sameeyay Degmada Dakota muddada lixda sanadood ee ka horreeyay taariiqda siidaynta codsigaaga. Codsiga waa in qoraal lagu codsado. Liistadan kuma ay jiraan siidaynta loo sameeyay daawaynta, lacag bixiska hawlaha daryeelka caafimaadka. Waxaa sii dheer, liistadan kuma ay jiraan siidaynta maclumaad toos lagugu soo diray ama reerkaaga loo diray. Liistadan kuma ay jiiraan macluumaad lagu diray higsasho oggolashadaada ama haddii kale uu sharciga amrayo. Haddii aad codsatid liistada wax hal mar ka badan sanadka gudihiisa, waxa aan kugu soo dallacaynaa ujro markasta ee aad wax codsato.

4. **Xaq ayaad u leedahay xadaynta isticmaallada ama siidaymaha PHI.** a) Xaq ayaad u leedahay inaad weydiiso Degmada Dakota inay xadayso sida loo isticmaalo ama loo siidayo PHIgaaga. Waa in aad codsiga qoraal ku codsatid iyo u sheegtid Degmada Dakota macluumaadka aad doonaysid in xaddidaadda lagu dabbaqo. Degmada Dakota qasab kuma aha in ay oggolaato xaddidaaddaada, marka laga reebo haddii marka sharciga farayo sida ku qoran qabyta b ee hoos ku xusan. Waxa aad ku weydiisan kartaa codsi markasta ee aad raabto ayado ah hadal ama qoraal in xaddiddaadyadaada aad codsatay lagu buriyo. Codsiyada hadalka waxaa laga diwaan gelin doona Degmada Dakota.
   b) Degmada Dakota waxaa waajib ku ah in ay aqbasho codsigaaga lagu xaddidayo siidaynta PHIgaaga haddii: siidaynta ay tahay mid la xariirta qorshe caafimaad ee lagu fulinayo bixinta qarashka ama hawlaha daryeelka caafimaadka iyo PHI uu quseeyo oo kaliya hal shay ee bixiyaha daryeelka caafimaadka uu qarashka jeebkiisa ka bixiyay gebiahaantiisa.

5. **Xaq ayaad u leedahay in aad dib ula noqoto oggolaashadaada siidaynta PHIgaaga.** Haddii aad saxiixdid oggolaashada lagu isticmaalayo ama lagu siidanayo PHIgaaga, waxa aad codsan kartaa in aad oggolaashadaa ka laabato markasta ee aad doonto. Dib u noqoshadan wax luga

kuma ay yeelanayso PHI kasta ee la siidaayay kahor inta aysan Degmadu helin rasiidka qoraalka ogaysiiskaaga.

6. **Xaq ayaad u leedahay in aad dooratid sida ay Degmada Dakota ay kula soo xariirayso**. Xaq ayaad uu leedahay inaad Degmada Dakota weydiiso in macluumaadka adiga kula wadaagto siyaabaha qaarkood ama meelaha qaarkood. Tusaale, adiga ayaa Degmada Dakota weydiin kara in ay macluumaadka u dirto shaqadaada halka ay gurigaaga ugu diri lahayd. Codsigan waa in aad qoraal ku codsatid. Uma baahnid in aad macnayso sababta codsigaaga.

7. **Xaq ayaad u leedahay in aad cabasho xaraysato**. Waxaad xaq u leedahay in aad cabasho xaraysato haddii aad wax ka qabto sida ay Degmada Dakota ay u isticmaashay ama u siidaysay PHI adiga kugu saabsan.

8. **Xaq ayaad u leedahay in lagu siiyo koobiga warqadda ogaysiiskan waqti kasta.**

Waxaad la soo xariiri kartaa Degmada Dakota in ay dib u eegan, saxaan, ama la xaddido Macluumaadkaga Dhawran ee Protected Health Information (PHI).

Waxaad la xariiri kartaa Sarkaalka Arrimaha Asturan ee Degmada Dakota cinwaanka ku xusan dhammaadka ogaysiiskan:

1. Weydii in ay eegaan ama koobi ka sameeyaan macluumaadkaada.

2. Weydii in ay xadeeyaan macluumaadka adiga kugu saabsan ee la isticmaalayo ama la siidaynayo.

3. Weydii in la tirtiro oggolaashadaada.

4. Weydii in ay saxaan ama baddalaan macluumaadkaada.

5. Weydii liiska waqtiyada ay Degmada Dakota ay siidaynayso macluumaadka dhawran ee adiga kugu saabsan.

Degmada Dakota ayaa diidi karta codsigaada lagu eegayo, koobi laga sameeynayo ama lagu baddalayo xogtaada. Haddii Degmada Dakota ay codsigaaga diido, waxa aan kuu soo diri doonnaa warqad kuu sheegaysa sababta diidmada codsigaaga ay ku dhacday iyo sida aad u weydisan karti iyo in laga fiirsado diidmada. Waxaa kale ee aad heli doontaa macluumaad ku saabsan xaraynta cabashada ee u jeedda Degmada Dakota ama Waaxda Caafimaadka Aadanaha Mareykanka, Xaafiiska Xuquuqda Madaniga (U.S. Department of Health and Human Services, Office for Civil Rights).

Sida loo xareeyo cabashada ama dhibaatada.

Haddii aad doonaysid inaad ashtako ka xaraysato ama dhibaato u soo gudbisid sida Degmada Dakota ay u isticmaashay ama u siidaysay macluumaadka kugu saabsan, waxaad cabashada u diraysaa Sarkaalka Arrimaha Asturan (Dakota County HIPAA Privacy Official) ee cinwaakiisu uu hoos ku xusanyahay ama waxaad u gudbinaysa Xafiiska Xuquuqda Madaniga, Laanta Cabashada Caafimaadka Asturan, Waaxda Caafiamadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Maraykanka (Office of Civil Rights, Medical Privacy Complaint Division, U.S. Department of Health and Human Services).

Cabasha kasta oo aad soo gudbiso marna wax uma dhimayso waxtarkaaga. Degmada Dakota marna uma bannaana inay kaa aargosato sababo la xiriira cabashada aad ka soo qortay, wadashaqaynta aad fidisay inta baaristu socatay, ama aad diidday in aad ku waafaqdo wax aad aaminsatahay in ay sharci darro tahay.

Attention. If you want free help translating this information, ask your worker.
ملاحظة: إذا أردت مساعدة مجّانيّة في ترجمة هذه المعلومات، فاسأل مساعدك في مكتب الخدمة الاجتماعيّة
កំណត់សំគាល់ បើអ្នកចង់បានជំនួយបកប្រែពត៌មាននេះដោយមិនគិតថ្លៃ សូមសួរអ្នកការ់សំណុំរឿងរបស់អ្នក។
Pažnja. Ako vam je potrebna besplatna pomoć za prevod ove informacije, pitajte vašeg radnika.
Ceeb toom. Yog koj xav tau kev pab txhais cov xov no rau koj dawb, nug koj tus neeg lis dej num (worker).
ຣະວັງ. ຖ້າຫາກທ່ານຕ້ອງການ ການຊ່ວຍເຫຼືອໃນການແປຂໍ້ຄວາມຄັ້ງກ່າວນີ້ຟຣີ, ຈົ່ງຖາມນ້ຳພັນງານຊ່ວຍເຫຼືອ ຂອງທ່ານ
Hubaddhu. Yo akka odccffannoon kun sii hiikamu gargaarsa tolaa fccta ta'c, hojjataa kcc gaafaddhu.
Внимание: Если Вам нужна бесплатная помощь в переводе этой информации, обратитесь к прикреплённому к Вам сотруднику социального обеспечения.
Ogow. Haddii aad dooneyso in lagaa kaalmeeyo tarjamadda macluumaadkani, weydii adeeg hayaha.
Atención. Si desea recibir asistencia gratuita para traducir esta información, consulte a su trabajador.
Chú Ý. Nếu quý vị cần dịch thông-tin nầy miễn phí, xin gọi nhân-viên xã-hội của quý vị.

Haddii aad wax su'aala ka qabto ogaysiiskan ama aad u baahantahay macluumaad dheeraada, fadlan la soo xariir Sarkalka Arrimaha Gaarka ee Degmada Dakota (Dakota County Privacy Officer).

Dakota County
Attn: HIPAA Privacy Official
1 Mendota Road West, Suite 500
West St. Paul, MN 55118
Telefoonka: (651) 554-5889

dpa/hipaa/notice of privacy practices

Amended June 25, 2009